



## **XEERKA MUDDO KORDHINTA RUQSADAHA NOOFEEMBAR 2010**

### **SU'AALAHAD INTA BADAN LA ISWEYDIYO**

Dokumeentigan wuxuu jawaabo ka bixinayaa su'aalaha aalaaba la isweydiyo ee ku saabsan dheereynta waqtiga ruqsadda maadaama ay saameyn ku leedahay ruqsadaha ay bixiyaan hay'adaha gobolka. Looguma talagalin in lagu bixiyo hagis khuseysa ruqsadaha ay bixiso dawladda hoose.

#### **WAA MAXAY XEERKA MUDDO KORDHINTA RUQSADAHA?**

Xeerka Muddo Kordhinta Ruqsadaha waxaa aasaas u ah Qeybta 173 ee cutubka 240 ee Xeerarka 20 10 . Ujeeddada laga leeyahay sharcigani waa in kor loogu qaado kobaca shaqo iyo soo kabashada dhaqaale ee muddada-dheer oo Xeerka Muddo Kordhinta Ruqsadaha ayaa si dheeraad ah u kaabaya ujeeddadan isagoo ku kordinayo laba sanno oo toos ah qaar ka mid ah ruqsadaha iyo shatiyada khuseeya isticmaalka ama dhisida hantida maguurtada ah. Ka dhaafitaanada xaddidan awgood, Xeerku wuxuu si toos ah ugu kordinaya, laba sanno kadib taariikhda la dabaqi karo ee ay sida kale dhici lahayd ruqsadda, ruqsad kasta ama ansixin kasta oo "dhaqangashay ama jirtay" muddada u-qalmitaanka laga bilaabo 15-ka Agoosto, 2008 ee soconaysay ilaa 15-ka Agoosto, 2010 .

#### **WAA MAXAY NOOCYADA ANSIXINTA EE KU JIRA XEERKAN?**

Sharcigu wuxuu khuseeyaa ansixinada sharciyeynta ee ay bixiyaan hay'adaha deegaanka, gobolka ama dawladeed ee khuseeya isticmaalka ama dhisida hantida maguurtada ah. "Ansixin" waxaa si ballaaran loogu qeexaa inay ka mid yihiin ruqsad, shahaado, shati , caddayn, go'aan, ka-dhaafid, kala duwanaansho, tanaasul, ruqsad dhismo oo kasta, ama ruqsadaha kale ama go'aaminta xuquuqaha, iyo amar kasta , marka laga reebo amarrada fulinta.

#### **MUDDO KORDHINTANI MA WAXAY KHUSEYSAA OO KELIYA RUQSADAHA DAWLADDU BIXISO?**

Maya, muudo kordhintan waxay khuseysaa dhammaan ruqsadaha loo qalmo ee ay bixiso hay'ad degmo, gobol, ama dawladeed.

#### **XEERKU WUXUU TIXRAACAYAA SHARCIYO KALE. XEERKANI MIYUU DABOOLAYA ANSIXINTA SHARCIYADA KALE ?**

Haa. In kastoo qeexitaanka "Ansixin" uu ku jiro liis gaar ah oo sharcio ah, ma ahan liis dhammaystiran oo ay ku wada jiraan shuruucda uu saameynayo Xeerkan. Sidaas darteed, Xeerka waxaa lagu dabaqi karaa dhammaan ansixinada khuseeya isticmaalka ama dhisida hantida maguurtada ah, marka laga reebo kuwa si cad ka-dhaafitaanka loogu sameeyay.

#### **MIYAY JIRAAQ NOOCYOO ANSIXIN OO KA BAXSAN SHARCIGAN?**

Haa. Ansixinada soo socda si cad ayaa ka-dhaafitaan loogu sameeyay sidaas darteedna MA daboolayo Xeerkan:

- Ruqsadaha ama ansixinada ay bixiso Dawladda Dhexe, ama hay'adaha gobolka ay u soo saartay si waafaqsan sharciga dawladda
- Ruqsadaha la bixiyo ee hoos yimaada qeybaha 20-aad ilaa 23-aad ee Cutubka 40B
- Ansixinada ugaarsiga, kalluumeysga iyo dhaqashada xoolaha ee ay soo saartay Waaxda Kalluumeysga iyo Duurjoogta ee hoos yimaada Cutubka 131-aad
- Amarrada fulinta.

#### **HAWLAHA KA HORREEYA DHISIDA DHISMAHA MIYAA LOO TIXGELIYAA IN LA ANSIXIYO?**

Maya . Istimcaalka ama dhisida hantida maguurtada ah waxay khusaysaa dhismeyaasha ama dabaqyada, ama goobta dhismada ay si gaar ah uga socoto ee la xiriira dhismeyaasha ama dabaqyada, halkii ay ka ahaan lahayd hawlaho ka horreeya wax dhisida sida nadiifinta saliidda ama walxaha khatarta ah ee goobta horay ugu yaallay. In kastoo tallaabootinkan oo kale loo qaadan karo shuruud horudhac ah oo loogu talagalay in lagaga dhigo hantida maguurtada ah mid ku habboon istimcaalka ama dhisida, hawlaho wax dhisida ee si madaxa bannaan loo qabto ee ka baxsan mashruuc dhismo oo weyn ma dabooli doono Xeerkan.



**XEERKA MUDDO KORDHINTA  
RUQSADAHA  
NOOFEEMBAR 2010**

**SHARCIGANI MA KHUSEEYAA XUQUQAH A HANTIDA EE LA SIYO DHINACYADA SADDEXAAD  
SI AY U ISTICMALAAN HANTIDA AY DAWLADDU LEEDAHA?**

Maya. Xeerkuma khuseeyo xuquuqaha mulkiiliyadda ee ay bixiso Dawlada Dhexe ee ka midka ah doorka milkiilaha dhulka sidaas darteedna ma khuseeyo fududeynta, ijaarida, shatiyada isticmaalka hantida (marka laga reebo ilaa xad in shatigu oggolaan karo isticmaalka ama dhisidda hantida, sida marka shatiga loo bixiyay sida uu qabo Cutubka 91-aad ama ruqsadda xannibaadda dhabbaha), *iyo/ama* xayiraadaha ilaalinta deegaanka ama beeraha.

**MIYAA 2-DA SANNO EE MUDDO KORDHINTA LOO SAMEYN DOONAA SI TOOS AH?**

Haa. Muddo kordhinta labada sanno ah ee sharcigu oggolaaday waa mid toos ah, taasoo la macno ah in si sharcii ah loo sameeyo. Ruqsad-haystaha iyo hay'adda soo saarta ruqsadda ama ansixinta midkoodna loogama baahna inay qaadaan tallaabo ay ku hirgelinayaan muddo kordhinta.

**MIYAY RUQSADDA AMA ANSIXINTA MUDDO KORDHINTA LOOGU SAMEEYAY SIDA  
SHARCIGA AH U BAAHAN TAHAY DIB-U-EEGIS DHEERAAD AH?**

Maya, ilaa qoddobada ku jira ruqsadda ama ansixinta lagu sheego dib-u-eegis dheeraad ah mooyaane marka ay dhaqangal noqoto muddada u-qalmitaanka. Ruqsadaha ama ansixinada la soo saaro kahor wakhti kasta oo ka mid ah muddada u-qalmitaanka iyo dhaqangalka inta lagu gudajiro muddada u-qalmitaanka, iyo ruqsadaha ama ansixinada la soo saaro inta lagu jiro muddada u-qalmitaanka waa la dhammaystiray ansixintooda waxayna shaqayn doonaan laba sanno oo dheeraad ah laga bilaabo taariikhda asalka ah ee dhicitaanka.

**WAA MAXAY TAARIKHDA CUSUB EE DHICITAANKA?**

Taariikhda dhicitaanka ee cusub waa laba sanno laga bilaabo taariikhda markii hore bar dhammaadka u ahayd muddada sharciga ah ee ruqsadda ama ansixintu shaqaynaysay. Tusaale ahaan, ruqsadda dhacday 1-da Sitembar, 2009 hadda dib ayaa dib loo soo kiciyay waxayna dhacaysaa marka la gaaro 1-da Sitembar, 2011.

**HAY'ADAHA SOO SAARA RUQSADDA AMA ANSIXINTA MA LOOGA BAAHAN YAHAY INAY  
SOO SAARAAN OGEYSIISYO QORAN OO LOO DIRAYO ANSIXIN-HAYSTEAASHA?**

Maya. Sharcigu ugama baahna hay'adaha soo saara ruqsadda ama ansixinta inay bixiyaan ogeysiis qoran oo loogu talagalay muddo kordhinta oo ansixin-haystaha loogama baahna ogeysiis qoran oo khuseeya muddo kordhinta lagu sameeyo ruqsadda ama ansixinta uu haysto. Si kastaba ha ahaatee, wakaaladda soo saarta ruqsadda ama ansixinta waxay mareegteeda gelin kartaa ogeysiiska guud ee Xeerk waxayna soo saari kartaa ogeysiis caadi ah oo khuseeya u-qalmida muddo kordhinta oo ku socda ansixin-haysteyaasha codsanaya dokumeenti loogu talagalay maalgelin ama laga leeyahay ujeeddooyin kale.

**XEERKA MA LAGU DABAQI KARAA RUQSADHA DHISMEYAASHA?**

Haa. Ruqsad kasta oo dhisme oo la soo saaro ama dhaqangal noqda inta u dhhexeya 15-ka Agoosto, 2008 iyo 15-ka Agoosto, 2010 waxaa lagu kordhiyay laba sanno laga bilaabo taariikhda ruqsaddu ay sida kale dhici lahayd.

**MIYAA XEERKA LAGU DABAQI KARAA GO'AANNADA SIYAASADDA, SHAHAADOOYINKA  
AMA KA-DHAAFITAANADA DEEGAANKA EE MASSACHUSETTS (MEPA)?**

Haa. Shahaadooyinka la bixiyay iyadoo la raacayo siyaasadda MEPA waxay si gaar ah ugu qoran yihiin gudaha qeexitaanka laga bixiyay "Ansixin" ee ku dhix jira Xeerk. Sidaas darteed, Shahaadooyinka la bixiyay ama dhaqangalka ahaa intii u dhexaysay 15-ka Agoosto, 2008 iyo 15-ka Agoosto, 2010 waxaa lagu dari doonaa laba sanno oo dheeraad ah kahor "Waqtii Dhicitaanka" inta uusan dhammaan ama dhaqangalka uusan dhicin iyadoo la dhowrayo ujeeddooyinka Xeerk. Sharcigu wuxuu si cad u dhowrayaa awoodda hay'adda soo saartay ruqsadda ama ansixinta ay ku laali karto ama dib ula noqon karto ansixinta iyadoo la raacayo shuruudaha oggolaanshaha laftooda, ama qaunuunka ama sharciyadda oggolaanshaha.

**MIYUU XEERKU KHUSEEYAA RUQSAD DHACDAY KAHOR INTA AAN LA GAARIN  
WAKHTIGA U-QALMITAANKA, BALSE AY MUDDO KORDHIN KU SAMEYSAY HAY'ADDAA  
SOO SAARTA RUQSADDA AMA ANSIXINTA?**

Haa, waase haddii muddo kordhantu ay keentay in ruqsaddu ay "dhaqangasho" inta lagu gudajiro muddada u-qalmitaanka; haddii codsiga ruqsadda uu ahaa mid go'aankiisa la sugayay balse oo aan la oggolaan inta lagu gudajiray muddada u-qalmitaanka ma uu noqonayo mid "dhaqangel ah ama jira" iyadoo la dhowrayo ujeeddooyinka Xeerk. Tusaale ahaan, ruqsadda la qorsheeyay inay dhacdo marka la gaaro



31-ka Janaayo, 2007, balse si sharcı ah ay saddex sanno ugu kordhisay hay'adda soo saarta ruqsadda (ilaa 31-ka Jannaayo, 2010), waxa hadda laga dhigayaa inay dhici doonto 31-ka Janaayo, 2012.

**HADDII RUQSADAYDU AY HAY'ADDU KORDHISAY INTII LAGU GUDAJIRAY MUDDADA U-QALMITAANKA, TAASOO KA DHIGAN INAAN LABA RUQSAD U HAYSTO ISLA HAL MASHRUUC, MIYAA LABADUBA LA MUDDO KORDHIN DOONAA?**

Iyadoo asal ahan labada ruqsadoodba muddo kordhintaa loo sameynayo, waxay shaqayn doonaan muddo isku mid ah, iyada oo labada sanno ee muddo kordhintaa ruqsadda labaad ay noqon doonto mudda taariikhdeeda dhicitaan wax xakameynayso oo lagu go'aan qaadanayo. Tusaale ahaan, haddii ruqsadda aad hayso ay dhacayso 15-ka Agoosto, 2009, oo aad codsatay aadna heshay hal sanno oo muddo kordhin ah ilaa laga gaaro 15-ka Agoosto, 2010, waqtiga kamadambaysta ah ee ay ruqsadaada cusub dhacayso waxay noqon doontaa 15-ka Agoosto, 2012.

**MIYAY HAY'ADDU LA NOQON KARTAA AMA JOOJIN KARTAA RUQSADDA AMA ANSIINTA SI LOOGA FOGAADO MUDDO KORDHINTA 2-DA SANNO AH?**

Maya. Hay'adda soo saarta ruqsadda ama ansixinta waa inay hayso sabab madax-banaan ay saamaxayaan shuruudaha ruqsadda, sharciga ama qaannuunka kala noqoshada ama joojinta ruqsadda.

**XEERKU MA SOO NOOLEYN KARAA RUQSADAHU DHACAY INTII LAGU GUDAJIRAY WAKHTIGA U-QALMITAANKA MARKAASOO HORAAN LOO DIIDAY CODSI MUDDO KORDHIN AMA DIB-U-CUSBOONEYSIIN?**

Haa. Xeerku wuxuu dhowrayaa oo keliya xuquuqaha qaarkood ee ay u leedahay wakaaladdu inay ku joojiso ama ka noqoto ansixinta. Xitaa haddii muddo kordhintaa horay loo diiday, ruqsadda ama ansixinta dib ayuu Xeerku u soo nooleyn donaa. Si kastaba ha ahaatee, maamulka oggolaanshaha bixinaya ayaa xaq u leh inuu ka noqdo ama wax ka beddelo oggolaanshaha ilaa xad muddada ay oggol yihiim ruqsadda, sharciga ama maamulka sharchiyeynta.

**MIYAY HAY'ADDU SOO SAARTA RUQSADDA AMA ANSIINTA SHURUUD KU XIRI KARTAA MUDDO KORDHINTA SI LOO SAXO DHIBAATOYINKA , CILLADAH, IYO/AMA ISBEDDELADA MASHRUUCEED MAADAAMA RUQSADDU DHACDAY?**

Maya. Muddo kordhintaa waa mid toos ah oo wax shuruud ah laguma xiri karo dheereynta muddada. Sharcigu wuxuu si toos ah u beddelaa taariikhda dhicitaanka ansixinta loo qalmo. Shaqo kasta oo dhacda oo loo adeegsado ruqsadda ama ansixinta la muddo kordhiyay waa inay waafaqsan tahay heerarka waxqabad ee jira .

Si kastaba ha ahaatee , hay'adda soo saarta ruqsadda ama ansixinta ayaa wax ka beddeli karta shuruudaha ruqsadda ama ansixinta la muddo kordhiyay haddii sharciga ku lammaan ama hay'adda sharchiyeynta ay saamaxayaan wax ka beddelka noocas ah.

**MIYAY HAY'ADDU SOO SAARTA RUQSADDA AMA ANSIINTA WAX KA BEDDELI KARTAA RUQSADDA SI AY U SAXDO DHIBAATOYINKA , CILLADAH, IYO/AMA ISBEDDELADA KU YIMAADA MASHRUUCMAADAAMA RUQSADDU DHACDAY?**

Haa. Xeerku wuxuu dhowraa awoodda hay'adda soo saarta ruqsadda ama ansixinta u leedahay inay wax ka bedesho ansixinta haddii sharciga ku lammaan ama hay'adda sharchiyeynta ay oggaalaadaan in la sameeyo wax ka beddel lagu saxayo dhibaatooyinka, cilladaha, ama isbeddelada ku yimaada mashruuc. Hawl kasta oo ka dhacda iyadoo la adeegsanayo ruqsadda ama ansixinta la muddo kordhiyay waa in ay u-hoggaansan tahay heerarka waxqabadka haddii kale waa in ruqsadda loogu dabaqi karo sidii horaan loo soo saaray ama loo muddo kordhiyay.

**MIYAY HAY'ADDU SOO SAARTA RUQSADDA AMA ANSIINTA QAADI KARTAA TALLAABOOYIN FULIN AH SI AY WAX UGA QABTO U-HOGGAANSAMI LA'AANTA?**

Haa. Sharcigu wuxuu taageeraa awoodda fulinta ama meelmarinta ee hay'adda soo saarta ruqsadda ama ansixinta.

**MIYUU XEERKU SAAMEEYAA KAHORTAGGA KHATARAHA EE SHURUUD AHAAN LA ISKA RABO SI AAN RUQSADDA U HAYSTO?**

Maya. Shuruudo kasta ama shuruudaha oo dhan ee khuseeya ruqsadda ama ansixinta loo muddo kordhiyay sida Xeerku uu qabo weli waa la sii dabbaqi doonaa.

**MIYAY JIRAAN WAX AAN KA AHAYN TAARIKHDA DHICITAANKA RUQSADDA AMA ANSIINTA AAN AHAYSTO EE UU XEERKU WAX KA BEDDELAYO?**



Maya. Ruqsadda ama ansixinta waxaa lagu xiraa isla shuruudaha muhiimka ah ee lagu dabbaqay markii ay hay'addu soo saaraysay, marka laga reebo wakhti kasta oo kumeelgaar ah ee lagu oggolaaday ruqsadda ee lagu kordhiyey muddo laba sanno ah. Ruqsadda ama ansixinta wax ka beddel ayaa lagu samayn karaa sida ku ca isla shuruudaha markii hore loo adeegsaday ruqsadda ama ansixinta ama lagu dhex oggolaaday sharciga ama qawaaniinta ku lammaan.

#### **HADDII HAWL LAGU QABANAYO RUQSADDA AMA ANSIXINTA LOO BAAHAN YAHAY IN LOO HELO RUQSADDO KALE, MIYAA IYAGUNA SI TOOS AH LOO MUDDO KORDHIN DOONAAA?**

Haddii ruqsadahan ama ansixinadan uu Xeerku daboolayo oo horay loo soo saaray ama loo dhaqangeliyay inta lagu gudajiray muddada u-qalmitaanka, sidoo kale waa la muddo kordhin doonaa.

#### **HADDI QOFKA ANSIXINTA HAYSTA UU SHARCIGU JEBIYO, MIYUU XEERKU MUDDO KORDHIYAA RUQSADDA AMA ANSIXINTA?**

Haa, balse hay'adda soo saarta ruqsadda ama ansixinta waxay qaadi kartaa tallaabo sixitaan ah oo habboon hadduu xadgudub dhaco. Xeerku ma farageliyo qodobbada kale ee muhiimka ah ee ruqsadda ama ansixinta, ama awoodda ay leedahay hay'adda soo saarta ruqsadda ama ansixinta.

#### **KA WARRAN HADDII RUQSADDA LA SOO SAARO INTA LAGU GUDAJIRO WAKHTIGA U-QALMITAANKA BALSE LAGA KEENO RACFAAN HAWSOCODSIINEED?**

Ruqsadda ama ansixinta sugaysa xukunka racfaanka inta lagu gudajiro muddada u-qalmitaanka looma kordhiyo mmuddada sababtoo ah ma ahan ruqsadda ama ansixinta kama dambeysta ah sidaas darteedna ma ahan "mid dhaqangal ah ama mid jirta." Si kastaba ha ahaatee, haddii la xaliyo rafcaanka hawl socodsiinta ee hor joogsaday inay ruqsadda ama ansixinta dhaqangasho oo la soo saaro ruqsadda kama dambeysta ah inta lagu gudajiro muddada u-qalmitaanka, waa ruqsad dhaqangashay ama jirto waxayna u-qalantaa muddo kordhn laba sanno ah. Haddii la xaliyo racfaanka hawsocodsiinta oo ruqsadda kama dambeysta ah la bixiyo muddada u-qalmitaanka kadib, ruqsadda kama dambeysta ah uma qalanto muddo kordhinta labada sanno ah.

#### **KA WARRAN HADDII RUQSADDA LA SOO SAARO INTA LAGU GUDAJIRO WAKHTIGA U-QALMITAANKA BALSE HADDA UU KU SOCDO RACFAAN GARSOOR?**

Si la mid ah ruqsad kasta oo uu ku socdo racfaanka garsoorka, waxay ku xiran tahay go'aanka ugu dambeeya ee maxkamadda. Haddii ruqsad u-qalmi karto muddo kordhin uu racfaan ku socdo, oo ay maxkamaddu ruqsadda taageerto, ruqsadda ayaa u-qalmi doonta muddo kordhin. Looma baahna muddo kordhin haddii ay maxkamaddu buriso ruqsadda.

#### **KA WARRAN HADDI RUQSADDA LA SOO SAARO INTA LAGU GUDAJIRO U-QALMITAANKA, BALSE RCFAAN LOO GUDBIYAY MAXKAMADDA OO AAN GO'AANKA MAXKAMADEED EE TAAGRI LAHAA RUQSADDA AAN LA SOO SAARIN ILAA LAGA GAARO KADIB WAQTIGA U-QALMITAANKA?**

Maadaama ruqsadda la soo saaray/bixiyay inta lagu gudajiray muddada u-qalmitaanka, waxay ahayd mid dhaqangal ah oo jirtay intalagu gudajiray muddada u-qalmitaanka waxayna u-qalantaa muddo kordhin.

#### **MA JIRTAAS SABAB RUQSADDA AMA ANSIXINTA LA MUDDO KORDHIYAY IYADOO LA RAACAYO XEERKA AYSAN UGU QALMI KARIN MUDDO KORDHINO MUSTAQBALKA AH IYADOO LA CUSKANAYO SHARCIYADDA IYO QAWAANIINTA LAGU DABAQI KARO RUQSADDA AMA ANSIXINTA?**

Maya. Ruqsadaha noocaas ah waxay ku xiranaan doonaan qoddobo kasta oo la taaban karo oo sharciyadda ama qawaaniinta ku lammaan.

#### **MIYUU ANSIXIN HAYSUHU DIIDI KARAA MUDDO KORDHINTA?**

Maya. Haddii xeerka lagu dabaqi karo ruqsadda ama ansixinta, si toos ah ayaa loo muddo kordhinayaa. Si kastaba ha noqotee, ansixin-haystaha wuu iska soo celin karaa ruqsadda isagoo raacaya shuruudaha iyo xaaladaha ruqsadaas ama ansixintaas ee ka maqnaan kara Xeerka.



**WAA MAXAY DAABACAADDA XEERKA DHISMAHA GOBOLKA (780 CMR) EE KU  
XIRAN MASHRUUCA SOCDA EE HOOS YIMAADA RUQSADDA MUDDO  
KORDHINTA LAGU SAMEEYAY ?**

Mashruucu waa inuu u socdo si waafaqsan daabacaadda Xeerka Dhismaha Gobolka kaasoo ruqsadda lagu soo saaray.

**ANIGOO FAHAMSAN IN RUQSADDAHA LA SOO SAARO IYADOO LA ADEEGSANAYO CUTUBKA  
408 LAGA DHAAFI DOONO XEERKAN, MIYAY RUQSADDAHA AAN HOOS IMAN CUTUBKA 40B  
EE LA XIRIIRA MASHRUUCA 40B (Sida RUQSADDAHA DHULALKA QOYAN, IWM.) LA MUDDO  
KORDHIYAA?**

Haa. Keliya ruqsadaha la soo saaro iyadoo la adeegsanayo qeybaha 20-aad ilaa 23-aad ee Cutubka 40B ayaan la muddo kordhinin. Ruqsadaha kale oo dhan ee la xiriira mashruuca waa la muddo kordhiyaa.

**MIYAY LACAGAHA 40R AMA LACAGAHA DHIIRIGELINTA EE XAKAMEYNTA DHISMEYAASHA  
LA KORDHIYAA?**

Maya. Sharcigu waxaa lagu dabaqi karaa oo keliya isticmaalka ama dhisidda hantida maguurtada ah mana kordhiyo lacagaha dhiirigelinta ee hoos yimaada Cutubka 40R.